# Wuxuu yiri: nin ayaa u yimid Nabiga-naxariis iyo Nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuuna kala hadlay Arimo, wuxuuna yiri: waxa Ilaahay doono adiguna doonto, wuxuu yiri Nabigu-naxariis iyo Nabadi korkiisa ha ahaatee-: "ma Ilaahay ayaad ila sintay? waxaad dhahdaa: waxa Ilaahay doono

Cabdullaahi Binu Cabaas-Allaha ka raali noqdo isaga iyo Aabihiye: Wuxuu yiri: nin ayaa u yimid Nabiga-naxariis iyo Nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuuna kala hadlay Arimo, wuxuuna yiri: waxa Ilaahay doono adiguna doonto, wuxuu yiri Nabigu-naxariis iyo Nabadi korkiisa ha ahaatee-: "ma Ilaahay ayaad ila sintay? waxaad dhahdaa: waxa Ilaahay doono."

[Xadiis Isnaadkiisu Xasan yahay] [waxaa wariyey ibn maajah,nisaa.i oo kawayn kuwariyey]

Nin ayaa u yimid Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuuna kala hadlay arin uu rabay, ka dibna wuxuu yiri: ''waxa Ilaahay doono adna aad doontid'', Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee, wuu ku diiday wuxuuna u sheegay in doonista Ilaahay oo lagu xiriiriyo doonista makhluuqa oo loo dhaxaysiiyo xarafka waaw ay tahay shirkiga yar, oo aysan u banaanayn qof muslim ah inuu ku hadlo. Nabigu scw ka dib wuuu u sheegay hadalka xaqa ah kaasoo ah: ''maashaa Allaah waxdahu'', oo doonista Ilaahay waa kali yeelayaa oo doonis cid kalae lagu xiririn maayo nooc ay tahayba.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5928